SHAQA DHAGAR AH
MA RUN BAA SHAQADANI?

GARO XAQUUQDADA

TAXANAHA

GANACSI SAMEEYSO!
Shaqeeyso $$$$1000 adigoo jooga gurigaaga!

Waxaan kuu heleynaa
SHAQOOYIN LACAG BADAN BIXIYA
Khidmadda aad dhiibto istaahila

DHAQSO KU DHAQAAQ!
Waxaa haddadan la qorayaa ammaan ilaaliyeyaal ee la siiyo $30 saacaddi!

WAA MAXAY SHAQO DHAGAR AH?

Shaqadani waxay noqon kartaa xayeysiin iyo iidheh been abuur ah oo aay sharikad ama wakaalad sameysatay si aay dadka shaqa doonka ah ooga qaadaan lacag mushqaayad ah oo la xiriirta adeegga iyo shaqada aay u raadinayaan dadkaasi. Shaqaalaha qaarkood sida kuwa Gaar Hayaha ah, waxay soo gudbiyeen war bixin ay kaga cabanayaan dhibaato ooga timid sharikadaha qaarkood, kuwaasoo ku khasbay ineey bixiyaan lacag aay ku sheegeen ineey la xiriirto taba bar aan jirin oo been ah. Haddaba inta aadan saxiixin heshiis (contract) ama aadan lacag ku bixinin tababar aadan ka war qabin, marka hore hubso in cidda shaqada bixineysa aay tahay mid si buuxda loogu kalsoonaan karo. Ogow mar haddad lacag bixiso way adaktahay inaad dib u soo ceshato.

TUSAALOOYIN KAA BADBAADINAYA SHAQO DHAGAR AH

Shirkadda aad shaqada ka raadsaneyso ma sharciyeysan tahay?
Inta awooddaada ah raadi marka hore inaad hesho war bixin ku saabsan cidda shaqada bixineysa. Waa inaad heshaa cidda shaqad bixineysa: magaceedoo buuxa, cinwaanka, fax iyo telefon lambar, xarunta xafiisyadeeda iyo wax bixin kasta oo ku anfici doonto sida, website ama email. Haddi cidda shaqada bixineysa (sharikadaha) aay diido inay bixiso war bixintooda kor ku xusan, go'aan waxaad ku gaari kartaa inaadan bixinin wax lacag ah oo aay ku weydiistaan, tan iyo inta aad war bixintooda buuxda ka heleyso. Waxa kale oo jira in haddii aay shaqada tahay JOB SCAM, sharikadda soo ban dhigtay xayeysiinta way adagtahay inaad hesho warbixinteeda.

Ma khasab baa inaan lacag bixiyo si aan u helo shaqo?
Cid kasta oo shaqa dadka siisa kuma warsan karto inaad lacag bixisaa inta aadan shaqada billaabin, Lacagahaasi waxaa ka mid ah lacag lagu soo iibinayo qalab,, tababar, nooli gaadiid, shaqa siin, ama arji nidaamin mararka qaarkood. Waxa lagu weydiin kara inaad soo iibsato dharka shaqada lagu galo – taasi waa sharci. Hayadaha shaqada ku meel gaarka bixiya kuma weydiin karaan lacag ku saabsan inaad iska diiwaan geliso xafiiskooda, ama kharash ku saabsan shaq aay kuu dirayan, ama aay kugu caawimaan sida aad xirfad u yeelan lahayd. Arrintani waa sharci darro. Hase yeeshe, Hayadaha shaqada qalqaaliya iyo kuwa loo yaqaanno "Headhunters" hadday kuu helaan shaqa joogta ah waxay ku warsan karaan inaad bixisaa lacag mushqaayad ah.

Ma waajib baa inaan tababarka lacag ku bixiyo?
Waxaad ka digtoonaataa sharikadaha shaqada bixiya iyo hayadaha shaqada dadka u raadiya, kuwaaso khasab kaaga dhiga inaad bixiso lacag ku saabsan tababar ayadoo aanan laguu xaqiijinin inay shaqa kuu hayaan tababarka markuu dhamaado. Haddi aad bixiso lacagta adiga oon hubsanin waxa dhibaato kugu noqon doonta sidaad lacagtaada dib uga soo ceshan lahayd. Sida badan cidda shaqada dadka siisa waxay bixiyaan nooc tababar ah marka aad shaqo cusub billabeyso. In kastoo waxa lagu siinaya uu saacaddiba u dhigmo lacag ka yar inta aad mushahar ahaan aad xaq u lahaaneyso marka aad shaqada billawdo. Lacagtaasi tababarka laguugu siinayo waa inay ka yaraanin saldhig ahaan saacaddiba inta ugu yar oo sharciga oggol yahay.

Weligaa yaan laguugu khasbin inaad saxiixdo heshiis
Inta aadan saxiixin heshiis marka hore hubso macnaha uu xambaarsayahay iyo waxa uu ku saabsan yahay. Haddii aad saxiixdo heshiis, taasi micnaheeda ma aha inaad oggoshahay heshiiska qeybtiisa sharci darrada ah. Laakinse haddi aad lacag bixisay way adagtahay inaad dib u soo ceshato lacagtaada. Marka hore weydiiso wakhti aad ka soo fikirto.

Ka digtoonaw kharashyada laga jarayo mushaarkaada
Waxa sharci darra ah in cidda loo shaqeeyo aay ka jartaan mushahaarka shaqaalahooda, qalab jabay ama si kama'ah loogu shaqeeyey. Cidda aad u shaqeyso mushaharka kama jaran karaan lacag haddi aay marka hore kuu sheegin oo kaa saxiixin inta aay la'egtahay lacagta aay kaa jarayaan. Hayadaha shaqada ku meel gaarka (Temp agencies) kaagama jaran karaan lacag ku saabsan shaqa aay kuu raadiyeen, ama kuu soo heleen, ama kugu caawimeen sidaa aad u kordhisan lahayd xirfad sida qorista 'resume'.

Sarita waxay aragtay shaqa gaar-haye oo la xayeysiinayo, arji bay u qoratay. Xafiiski shaqada xayeysiinayey waxa looga sheegay in loo xaqiijinayo oo loo ballan qaadayo shaqada gaar haye miiska soo dhoweynta haddi aay bixiso lacag dhan $250 si aay u dhameys tirato tababarka inta lagu jiro fasaxa toddobaadlaha. Sarita way oggolaatay. Mar kasto oo aay sharikaddi wacdo waxa lagu qancinayey in shaqa raadin loogu maqan yahay, laakinse ma jirin hubaal in shaqa loo heli doono. Heshiiski aay saxiixday kama haysanin nuuqul oogu dambeysti markay sharikaddi wacda jawaab looma soo celineynin. Waxa muhim ah inaad iska jirto in waxyabahan oo kale aay kuugu dhacaan. Haddii aad lacag haysato ogow waxa aad sameyneyso.

IS-BADBAADI

- Si tafaf tiran meel ku qor waxa dhacay, ayadoo aad ku dareyso taariikhda maalinta, wakhtiga, cinwaanka, maragta iyo xatta lambarka laysin ee gaariga. Waxa dhici karta inaad akhbaartani aad u baahato mar dambe aad dooneyso inaad lacag hore lagaa qaaday aad dib u soo ceshato.
- Haddii xayeysiintani ama iidhehdani lagu soo qoray wargeys, waxaad wacdaa xafiiska wargeyska, ooga war bixi shaqada dhagarta ah waxay tahay. Waxa dhici karta inay ka biixiyaan xayeysiintaasi qoraalkooda, ama dib aay u eegaan warbixintaada.

TAAGEERO HEL

Workers' Action Centre

Xuquuqdaada shaqaale ahaan iyo taageero aad heshaa sida aad qorshe u sameysan lahayd
416-531-0778 ama tag www.workersactioncentre.org

- Haddii shaqa xayeysiinta noocan ah aad ku aragto xarumaha shaqa raadinta war geli waxa dhacay, isla markaasi weydiiso in xayeysiintaasi laga saaro meesha, waxa kale oo aad wacdaa sharikadda xayeysiinta soo ban dhigtay. Waxa dhici karta in laf ahaantooda aay shaqaalaha kale ooga digaan xiriirka iyo isticmaalka xaruntaasi shaqa raadinta ah.
- Sharikadaha qaarkood waxay shaqaalaha ka saxiixaan inay yihiin Qandaraasle madax bannaan. Wakhtiyada qaarkood sharikadaha waxay sidaas u sameynayaan inay ka weecdaan sharciyada caadiga ee shaqada iyo shaqaalaha. Suurta gal ma aha inaad adiga shaqaale ahaan aad saxiixdo heshiis dayacaya xuquuqdaada. Annaka na soo wac si aad u hesho war bixin ku saabsan xaaladda shaqaale-nimadaada, waxa suurta gal inaad weli shaqaale ahaato xataa haddi madaxdaada shaqada kaa fariisiyaan Xarunta Waxqabadka Shaqaalaha wixi tafaasiil ah oo intaas dhaafsan oo ku saabsan.



416-531-0778 | info@workersactioncentre.org

www.workersactioncentre.org

Funded by / Financée par Citizenship and Immigration Canada / Citoyenneté et Immigration Canada

Tixraac: Wasaaradda Shaqada ee Ontariyo. Macluumaadka warqaddan ku xusan waa kuwa guud ah.
Faahfaahin intaa ka badan la xiriir Wasaaradda Shaqada ee Ontariyo.